

**OGAYSIISKA ISBAHAYSIGA DEGMADA SAN DIEGO EE DHAGAYSIGA DADWEYNAHA  
IYO OGAYSIISKA HELITAANKA**

**ISBAHAYSIGA DEGMADA SAN DIEGO  
QORSHE SANADEEDKA 2024-25**

**DEEQDA HORUMARINTA BULSHADA (CDBG), ISKAASHATADA MAALGASHIGA  
GURYAHA (HOME), DEEQAHA XALKA DEGDEGGA AH (ESG), IYO DEEQAHA  
BARNAAMIJKA FURSADAH GURIYEYNTA EE LOOGU TALAGALAY DADKA QABA  
AIDS-KA (HOPWA)**

Waxaa halkaan lagu bixinayaa ogeysiis ah in Guddiga Kormeerayaashu ay qaban doonaan dhegeysi dadweyne markay tahay March 12, 2024, wakhtiguna yahay 9:00 a.m. qolka 310 ee Xarunta Maamulka Degmada, 1600 Pacific Highway, San Diego, CA, si loo tixgeliyo Qorshaha sannadlaha ah ee Sannad Maaliyadeedka 2024-25. Guddigu waxay tixgelin doonaan isticmaalka la soo jeediyay ee lagu qiyaasay: \$4,227,770 oo ah Deeqaha Horumarinta Bulshada (CDBG); \$3,496,403 oo ah deeqaha Iskaashatada Maalgelinta Guryaha (HOME); \$370,070 oo ah deeqaha Xalka Degdegga ah (ESG); iyo \$6,240,872 oo ah Fursadaha Guriyeynta ee Dadka qaba HIV/AIDS (HOPWA) deeqaha ay Degmadu ka heli doonto Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Maraykanka (HUD). Guddigu waxaa ay sidoo kale tixgelin doonaan isticmaalka la soo jeediyay ee lagu qiyaasay \$2,050,000 Samad Maaliyadeedkii 2024-25 CDBG, HOME, iyo Dakhliga Barnaamijka HOPWA iyo dib u qoondeynta qiyaas ahaan \$14,400,000 ee qoondooyinka HOME, ESG, CDBG iyo HOPWA. Tirooyinka waxay ku saleysan yihiin heerarka maalgelinta sanad hore.

Qorshaha Sannadlaha ah wuxuu qeexayaa waxqabadyada la soo jeediyay in la maalgelinayo Sanad Maaliyadeedka 2024-25 iyo qoondeynadii sannadkii hore, kuwaas oo ah inay buuxiyaan yoolalka lagu qeexay Qorshaha Isku-dhafka ah ee 2020-24.

Barnaamijka CDBG iyo ESG wuxuu maalgelin siiyaa aagga aan la wadaagin ee Degmada iyo magaalooyinka Coronado, Del Mar, Imperial Beach, Lemon Grove, Poway, iyo Solana Beach, oo sidoo kale loo yaqaan Urban County (Gobolka Magaalooyinka). Deeqaha CDBG waa in: (1) looga faa'ideeyaa dadka dakhligoodu hooseeyo; (2) looga hortagaa/ lagu baabi'iyaa xaafadaha isku raranta ah iyo cudurrada; ama (3) lagu daboolaa baahiyaha horumarinta bulshada ee degdega ah. Barnaamijka ESG waxa uu gargaarka hoylaawayaasha ku maalgeliyaa Gobolka Magaalooyinka. Barnaamijka HOME waxa uu maalgeliyaa hawlaha guryeynta ee qiimahooda la awoodi karo ee ka qeyb ah Isbaheysiga HOME ee Degmada. Isbaheysiga HOME waxa ku jira Urban County (Gobolka Magaalooyinka), iyo sidoo kale magaalooyinka Carlsbad, Encinitas, La Mesa, San Marcos, Santee, iyo Vista. Barnaamijka HOPWA wuxuu guryo/adeegyo ku maalgeliyaa dadka qaba HIV/AIDS iyo qoysaskooda ee jooga Gobolka San Diego.

Nuqullada qorshooyinka qabyada ah ayaa diyaar u ah dib u eegis ku samaynta iyo faallooyin ka bixinta dadweynaha, muddada 30-ka maalmood ee faallo ka bixinta ah laga bilaabo Febraayo 9, 2024, ilaa Maarso 12, 2024, waxaana laga heli karaa websaydka Degmada [www.sdhcd.com](http://www.sdhcd.com). Dadka u baahan in laga caawiyo ka qayb galka kulumada (tusaale ahaan, dadka aan Ingiriisiga ku hadlin, maqalkoodu culus yahay, iwm.) waa inay la xiriiraan HCDS shan maalmood kahor intaan la gaarin kulanka. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan wac (858) 694-8724. Si aad u hesho wixii caawimaad ah oo la xiriira naafonimada maqalka, fadlan wac (866) 945-2207.